B. Nooc tartanka, shahaadooyin ama wixii u dhigma iyo nidaamka ka qaybqalka tartanka.

T. Qaabka hubinta shahaadooyinka;

J. iyo wixii kaloo loo baahdo.

Qodobka 30 (Xulashada Xubnaha)

Xulashada Xubnaha ee loo dalacinaayo Saraakiil, Kormeerayaal, S/xigeen ama Qoris Ciidan waxaa samaynaya Taliyaha Ciidanka, iyadoo ay kaalinayaan Guddi qiimayn oo isagu Magacaabo waqti ka waqti.

Duq magaaladu markuu dalacsiinaayo kormeeryaal ama S/xigeen iyo qoris Ciidan isagoo la tashanaya Guddiga Fulinta ee Deegaanka wuxuu magacaabayaa Guddi Farsamo.

Qodobka 31 (Layli Sarkaal)

Tartamayaasha Dadweynaha ee ku guuleysta in loo qaato saraakill waxaa lagu qorayaa Layli Saraakiil iyagoo yeelanaya wixii xuquug ah. fulinaayana wixii waajibaad ah ee la xidhiidha Xeerarka iyo Xeer nidaamiyaha Boliiska.

2. Tartamayaasha ku guuleysta Saraakiil ee ka tirsan Ciidanka Boliiska ee noqda Layli Saraakiil, waxay haysanayaan derajadii ay lahaayeen intaan loo Magacaabin Layli Sarkaal.

Qodobka 32 (Imtixaanka u dambeeya)

layli Sarkaal kasta oo markii hore laga qaatay Dadweynaha ee ka gudbi waaya imtixaanka u dambeeya sabab kasta ha ahaatee shaqada waa laga eryayaa amaba Xubnaha Ciidanka ee kale ayaa lagu darayaa.

2. Layli sarkaal kasta oo lagala soo dhexbaxo xubnaha Ciidanka Boliiska ee ka gudbiwaaya imtixaanka ugu dembeeya wuxuu haysan karaa derejada uu lahaa intaan loo qaadan layli sarkaal.

Qodobka 33 (U magacaabid derejo Sarkaal)

Layli sarkaal kasta oo ka gudba imtixaanka ugu dambeeya waxaa lagu magacaabayaa derejo sarkaal.

Qodobka 34 (Kala horeynta u Magacaabid Sarkaal)

Iyadoon waxba loo dhimayn mabd'a kala horeynta dhabta ah, tartanka imtixaanka ayaa xadaynaya mudnaanta kala horreynta iyadoo loo eegaayo dhibcihii imtixaanka.

Qodobka 35 (saraakiisha hawlgabka ah)

Saraakiisha hawlgabka ah ee loo arko inaan looga maarmin shaqada Boliiska waxaa lagu meelayn karaa iyagoo Saraakiil ah shaqada Ciidanka kadib markuu sidaa soo jeediyo Taliyaha Ciidanku ku meel gaadh ahaan.

2. Saraakiisha dib loogu meeleeynaayo shaqada Ciidanka siday muujinayso Xubinta hore ee Qodobkan, waxay ka gelayaan Liiska saraakiisha Ciidanka halka ugu dambeysa.

Qodobka 36 (Saraakiisha laga soo wareejiyo Ciidamada kale)

sarkaal kasta oo laga soo wareejiyo Ciidamada kale oo lagu soo wareejiyo Ciidanka Boliiska, wuxuu ka geleyaa Liiska Saraakiisha Ciidanka halka ugu dambeysa ee Derejadiisa.

Qodobka 37 (Shaqada Joogtada ah)

Noocyada shaqada joogtada ahi waa:-

B. Hawlgalka shaqo (Active Service)
t. Ku magnaansho fasax
j. Laalid shaqo (Suspension from service)

Qodbka 38 (Hawlgalka shaqo)

Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska oo shaqo loogu yeedhi karo waqti kasta, waxaa loo qaadanayaa inuu ku jiro hawlgal shaqo (Active service)

2. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska oo ku jira hawlgal shaqo waa inuu Qof ahaan fayow yahay, shaqadana diyaar u yahay.

3. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska inuu u qalmo hawlgal shaqo iyo inkale waxaa xaqiijinaya Taliyaha Ciidanka waqti ka waqti.

Qodobka 39 (Ku magnaanshaha fasaxa)

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska oo si ku meel gaadh ah shaqada hawlgalka looga daayey waxaa loo aqoonsanayaa inuu ku magan yahay fasax asbaabha soo socda awgood:-

   B Bukaan ku meel gaadh ah oo kaga yimid shaqada;
   T. Maxbuus Dagaal;
   j. Bukaan ku meel gaadh ah oo aan kaga iman shaqada;
   x. Asbaabo gaar ah.

2. Ka magnaanshaha Shaqada waxaa la siin karaa:-

I. In sharci ahaan caddayn la soo saaro markay la xidhiidho Xarafka (T);

II. Codsi ama amar waafaqsan caddayn dhakhtar markay la xidhiidho xarafka (B) iyo (J);

III. Codsi gaar ahaaneed markay hawshu saamaxayso markay la xidhiidho xarafka (X);

3. Marka xubin Ciidanka Boliiska ka tirsan la siinayo fasax bukaan awgeed waa in la siiyaa fasaxii hore ugu ururay.

4. Ku magnaanshaha fasaxu wuxuu ka bilaabanayaa taariikhda warqadda lagu muujiyey.
Ku Magnaanshaha Maxbuus dagaal wuxuu ka bilaalbanayaa maalinta la qabtay.

5. Marka ay dhammaato asbaabta keentay ku magnaanshaha Fasax, Xubinta Ciidanka Boliiska ka tirsan loo agoonsan maayo fasax isku geynta muddada ku magnaanshaha fasaxa oo ka timid asbaabo gaar ahaaneed ama mid bukaan oo aan kaga iman shaqada, kamana badnaan karto laba sanno muddo ah shan sanno oo xidhiidh ah gudahood.

6. Isku geynta mudada ku magnaanshaha fasaxa oo kaga timaada shaqada kama badnaan karto saddex sanno muddo ah shan sanno oo xidhiidh ah gudahood.

7. Xubinta Ciidanka Boliiska ah markuu ka dhamaado fasaxu waa inuu shaqada dib ugu laabtaa.

8. Haddii mudada ka magnaanshaha fasaxu ka badnaanto muddo laba sanno ama saddex sanno hadba siday xaaladdu tahay muddo shan sanno ah oo xidhiidh ah gudahood shaqada Ciidanka waa laga saari karaa.

9 Haddii ay xaalad deg deg ihi timaado ama baahi shaqada awgeed, Xubinta Ciidanka Boliiska fasaxa ku jirta shaqada waa loogu yeedhi karaa, waxaase, shardi ah inuu Qofku fayowyahay shaqadana qaban karo.

10. Ciidanka Boliiska heer qaran fasaxa waxaa siin kara Taliyaha Ciidanka, Ciidanka Boliiska heer deegaan fasaxa waxaa siin kara Duqa Magaalada.

11. Xubinta Ciidanka Boliiska ee fasax u qaata asbaab gaar ah awgeed ma lahaan doono Mushahar muddada fasaxa.

12. Xubinta Ciidanka Boliiska ee la siiyo fasaxa uu sababay Bukaan awgeed oo aan shaqada kaga iman, waxaa la siinayaa Mushahar buuxa lixda bilood ee hore, Lixda Bilood ee dambe waxaa la siinayaa Nus mushahar wixii intaas ka dambeeya Mushahaarada waa laga joojinayaa.

13. Xubinta Ciidanka Boliiska ee la siiyo fasaxa uu sababay Bukaan awgeed oo kaga yimid shaqada, waxaa la siinayaa Mushahar buuxa muddo sannad ah, sannadka dambe waxaa la siinayaa Nus Mushahar, wixii intaas ka dambeeya Mushahaarada waa laga joojinayaa.

14. Iyadoon waxba loo dhimeyn xubnaha Qodobkan ee kor ku xusan, xubninta Ciidanka Boliiska ee Bukaankiisu ka yimid sabab ka baxsan hawsha Ciidanka, shaqada waa laga siidaynayaa iyadoo aanu dhammaan sannandka ku xusan xubinta 11aad ee Qodobkan, haddii loo arko in bukaankiisu yahay midaan u ogolaan karayn inuu shaqada qabto. Waxaa Shardi ah in caddayn dhakhtareed jirto:-

**Qodobka 40 (Laalidda Shaqo)**

**Laalidda shaqo waxaa loo samayn karaa:-**

B. Asbaab taxadar (Precautionary);
T. Asbaab Asluubeed;
J. Asbaab Xukun Maxkamadeed;

2. Xarafka (B) iyo (T) waxaa algu dabakhaya Xubinta Ciidanka Boliiska ee lagu eedeeyo xaqiiqo jirta (Xaqaaiq) oo ku saabsan gef-Asluubeed ama mid ciqaab. Haddii Xubinta Ciidanka loo soo saaro warqadaha qabashada laalidda shaqadu waa waajib (Compulsory)

3. Haddii Xubin Ciidanaka ka tirsan dacwo lagu oogo, oo Xukun Maxkamadeed caddeeyo inaan dembi dhicin ama aan xubintu ahayn kii dembiga galay, laaliddii shaqada waa laga noqonayaa.

4. Laalidda Shaqada waxa kaloo laga noqon karaa marka Xubinta aan lagu oogin dacwadda ciqaabeed ama Gef asluubeed muddo caqli gal ah gudaheed amase aanay ciqaabi ka dhalan oogistii dacwaddaas.

5. Hadaanu Xeerka Ciidamada Qalabnka sidaa sheegin xukun xadhig ciqaabta ka daba tuurka ah ee raacaysa (Accessory Penelty), xukunkii xadhigu wuxuu keenayaa laalista shaqada inta ay jirto fulinta xukunkaasi.

6. Xubinta Ciidanka haddii shaqada looga laalo gef asluubeed awgeed , waa in loo sheegaa Nuxurka eedaynta iyo asluubta laalidda.

7. Laalista shaqada waa inuu ogolaadaa Taliyaha Ciidanka Boliiska ama Duqa magaalada hadba Ciidanka heerka uu yahay. Haddii laalidda shaqaddu la xidhiidho Sarkaal waa inuu marka hore dhegaysto taliyuhu Guddi asluubeed. Wargadda Laalidda waa inay muujiso sababta keentay laalista shaqada.

8. Xubinta Ciidanka ee shaqada laga laalay waxay yeelanaysaa Nus Mushahar muddada Laalistu socoto.

9. Marka laga hadlaayo Gunnada hawlgabka iyo Xaqa Xubinta Ciidanka waa loo tixgelinayaa mudadii uu ku jiray Laalidda shaqada haddii aan laga noqon laalista.

Qodobka 41 (Raadadka Asluubeed ee ka yimaada Xukun Maxkamadeed)

Haddii Xubin Ciidanka ah Maxkammadi siidayso caddayn la'aan awgeed, ka reebimayso Xubintaas in lagu qaado Gef asluubeed ama fulinta Ciqaabta Asluubta.

Qodobka 42 (Ka joojin shaqada joogtada ah).

Xubinta Ciidanka Boliiska ka tirsan waxaa shaqada looga joojin karaa arrimahan soo socda:-

B. Da'
T. Bukan;
J. karti darro la xidhiidha derejada uu haysto;
X. Codsi shaqo ka teqid;
Kh. hawlgab khasab ah.

3. Sarkaal Ciidanka Boliiska ka tirsan waxaa shaqada joogtada ah looga joojin karaa Xeer madaxweyne oo marka hore uu soo jediyo Taliyaha Ciidanka Boliisku isla markaana dhegeystay Wasiirka Arrimaha Gudaha.

4. Xubinta Ciidanka Boliiska ka tirsan ee si joogto ah hawsha u qaban kari weyda ama ku bogsan waaya muddada ku magnaanshaha fasaxa ee ku xusan Qodobka 38 aad shaqada waa laga saari karaa; sidoo kale shaqada waa laga saari karaa Xubinta loo arko inaanay u qalmin derejada uu haysto, marka laga eego xag akhlaaqeed iyo shaqadaba.

5. Xubin kasta oo ay ku caddaadaan arrimahan soo socda shaqada waa laga saari karaa:-

B. ka Reebid xuquuq ama awood lahaansho ee sharcigu qofka siinayo "Interdiction"

T. Haddii uu qabto shaqo ka duwan tan Sharciga Boliisku oggolyahay;

J. Haddii lagu xukumo dembi aan kama' ahayn oo ay la socoto shaqo Guud (Interdiction of Public Office);

X. Uu lumiyo muwaadinimada S/land;

Kh. Uu galo Ciidamo shisheeye isagoon amar u haysan.

D. Xubinta Ciidanka Boliiska ee shaqada looga siidayo arrimaha kor ku xusan shaqda dib looma qori karo, inkastoo ay joogsato asbaabihii keenay shaqo ka saariddu.

Qodobka 43 (Xubnaha Hawlgalka)

Xubnaha Ciidanka ee shaqada laga fadhiisiyey waxaa lagu dhaqayaa Xeerarka iyo Xeer nidaamiyaha jiray, iyadoo loo eegaayo derejada uu sitay markii shaqada laga fadhiisiyey. Xubintaas Ciidanka dib waa loogu yeedhi karaa shaqada ama isagoo codsadayba si ku meel gaadh ahaan ah.

2. Xubinta Ciidanka haddii uu Sarkaal yahay waxaa dib u yeedhistiisa samaynaya madaxweynaha, iyadoo uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanku, lana dhegeystay Wasiirka Arrimaha Gudaha, dib u yeedhistaa xubnaha kale waxaa samaynaaya Taliyaha Ciidanka Boliiska markay heer Qaran tahay.

3. Xubinta Ciidanka ee hawlgabka ah dibna loogu yeedhay shaqada Ciidanka, waxaa lagu dhaqayaa Xeerarka iyo Xeer nidaamiyaha Ciidanka ee la xidhiidha shaqada joogtada ah.

Qaybta 6aad (Dalacaada)

Qodobka 44(U qalanka Dalacaadeed (Qualification for Promotion)

Si loogu qalmo dalacadeed waxaa Xubinta laga doonayaa fayoobi dhan: akhlaaq wanaag; wax garad; Tacliin Guud iyo u qalnaanta shaqo ee Derejada Cusub ee loo dalacayo.

Qodobka 45 (Noocyada dalacaadda)

Dalacaadda waxaa sal looga dhigayaa mudnaan (Seniority); mutaysi (Merit) iyo muteysi gaar ahaaneed (Exceptional merit).

2. Iyadoo la tixgelinaayo ku talogalka Ciidanka dalacaadiisa, waxaa Taliska Ciidanku diyaarinayaa jagooyinka ka banaan kormeerayaasha: Saraakiil-xigeenka iyo Askarta.

Qodobka 46 (Dalacaadda la xidhiidha mudnaanta)

U bislaanshaha dalacaada lagu kasbanaayo mudnaanta xubintu waxay ku heli kartaa hanashada u qalanka sida uu tilmaamayo Qodobka 44aad ee Xeerkan, Xubintu waa inay ku jirto Liiska mudnaanta ee Muujinaaya jagooyinka u banaan dalacaadda.

2. Dalacaadda lagu kasbado mudnaanta waa in laga sameeyo siday iskugu xigeen Xubnuhu Magacyada derejadoodii hore.

Qodobka 47 (Dalacaada abaalmarinta)

Xubin kasta oo hanan karta shuruudaha u qalanka sida uu tilmaamayo Qodobka 44 aad ee Xeerkan, ee ku jiray kala horreynta Mutaysiga jagooyinka u banaan dalacada amaba laga helo inuu si gaar ah ugu qalmo waa la dalacsiin karaa iyadoo aan loo eegin mudnaan.

2. Dalacaada lagu helo mutaysi waxaa loo samaynayaa sida xubnaha Ciidanku uga muuqdaan Liiska qiimaynta ama dhibcaha imtixaanka la qaaday.